



The Transitional Federal Government of the Somali Republic
Office of the Prime Minister

Ref: XRW/OM/PR 00126/01/12

Date: 19 January 2012

War-Saxaafadeed
Shirka Golaha Wasiirada
Muqdisho – 19 January 2012

(Muqdisho, 19 January 2012) Shir ay maanta yeeshen Golaha Wasiirada oo uu shir-guddoominayey Ra'iisul Wasaaraha Soomaaliya Dr Cabdiweli Maxamed Cali ayaa looga hadlay arrimo dhowr ah oo ay ka mid yihiin safarkii Ra'iisul Wasaaraha ku tegey Kenya iyo Djibouti, arrimaha amniga, Gargaarka Bani'aadanimo, canshuuraha berriga iyo warbixin wasiirka Haweenka iyo 3 wasiir ku xigeen oo ka qeybgalay shir ka dhacay Tunis.

Ugu horreyntii Ra'iisul Wasaaraha ayaa sheegay inuu Nairobi uga qeybgalay 09kii Janaayo shirka isku xirka iyo la socoshada Roadmapka. Shirkan ayey beesha caalamku ku ammaaneen Dowladda Soomaaliya horumarka ballaaran ee laga sameeyey Roadmapka sida dhanka amniga, dib-u-heshiisinta, isku xirka maamulada iyo dowladda dhexe, dastuurka iyo dib-u-habeynta baarlamaanka. Sidoo kale Ra'iisul Wasaaraha waxuu ka warbixiyey booqashadii rasmiga aheyd ee uu ku tegey Djibouti oo uu sheegay in Madaxda Djibouti ay si heer sare ah u soo dhoweeyeen, isla markaana uu la kulmay Madaxweynaha Djibouti Ismail Omar Gelleh, Ra'iisul Wasaaraha Djibouti Dileyte Mohamed Dileyte iyo qaar ka mid ah wasiirada Djibouti. Ra'iisul Wasaaraha waxuu sheegay in Dowlada Djibouti ay rajo badan ka muujiyeen horumarka ballaaran ee Dowladdu ku tallaabsatay ee dhan walba sida abaaraha, amniga, iyo dhaqangelinta roadmapka.

Wasiirada Amniga ayaa sheegay in horumar weyn laga sameeyey dhanka amniga oo howlgalo ay ciidamada amnigu sameeyeen lagu guuleystay oo 12 qof lagu soo qabtay iyo 18 qori. Golaha waxey ku ammaaneen hay'adaha amniga dadaalkooda waxeyna isku raaceen in degmooyinka ay hay'adaha amniga kala shaqeyaan sidii amniga loo sugi lahaa isla markaana loo soo celin lahaa kala danbeyntii iyo sharaftii shacabka Soomaaliyeed. Goluhu waxey ku ammaaneen shacabka sida ay ula shaqeyeen hay'adaha amniga, kana codsadeen in shacabka iyo hay'adaha amniga ay sii xoojiyaan wadashaqeyntooda.

Guddiga Wasiirada Abaaraha ayaa warbixin siiyey golaha ee ku wajahan sida ay u socdaan howlaha gar-gaarka bani'aadanimo, waxeyna sheegeen in qorshihii Dowladda ee dib-u-dejinta barakacayaasha uu bilowday oo dhowaan la qorsheynayo in illaa 10 kun oo qoys loo sameyn doono dib-u-dejin dhameystiran.

Wasaaradaha Maaliyadda iyo Gaadiidka ayaa ka warbixiyey howlo lagu hirgalinayo canshuuraha gaadiidka, waxeyna sheegeen in qorshahaas uu si wanaagsan u socdo. Golaha waxey ugu baaqeen gaadiidleyda inay iska bixiyaan canshuuraha ku waajibay oo 1da Febraayo gaadiidka aan bixinin canshuurtii ku waajibtay la saari doono ganaax. Wasaarada Maaliyada ayaa waxey ka warbixisay muhiimada canshuuraha si loo fuliyo adeegyada bulshada oo ay ka mid yihiin amniga, waxbarashada, caafimaadka iwm, waxeyna ka codsadeen in ganacsatada ay kala shaqeyaan wasaaradda maaliyadda howlaha canshuur ururinta.

Ugu danbeyntii Wasiiradda Haweenka ayaa waxey ka warbixisey shir ay ka qeybgashay oo looga hadlayey gudniinka fir-fircoon oo ka dhacay magaalada Garowe oo ay sheegtay in shirku uu ku dhamaaday guul iyo is-fagarad isla markaana ay kala tashan doonto wasaarada caafimaadka iyo garsoorka dhaqangelinta barnaamijkan. Sidoo kale golaha waxa warbixin siiyey wasiir ku xigeenada Biyaha, Tamarta, iyo Beeraha iyo Xanaanada Xoolaha oo safar shaqo ku tegey magaalada Tunis, kulamana la yeeshay Bankiga Horumarinta Afrika oo ay sheegeen in Bankigu uu diyaar u yahay inuu maalgeshi ku sameeyo Soomaaliya. Waxey kaloo sheegeen in Ra'iisul Wasaaraha Soomaaliya Dr Abdiweli Mohamed Ali uu u saxiixay Bankga Horumarinta Afrika 3 million oo mashaariic biyo gelin ah loogu sameynayo Somaliland.

- DHAMAAD -